What do I need to know if my child gets a formal caution?

Parent/carer information

# Maxaan u baaha nahay inaan ogaado haddii ilmahaygu uu helo digniin toos ah?

## Macluumaadka xannaaneeyaha/waalidka

### Waa maxay digniinta tooska ah ee dabeecada la saluugay?

Dabeecada la saluugay waa wax uu qofi sameeyo oo laga yaabo inay keento ama ay keentay dhib ama khatar nafsadooda ama dadka kale. Digniinta tooska ah waxay u sheegaysaa ardeyga in dabeecadiisu ay keentay ama laga yaabo inay dhib u keento ama khatar nafsadooda iyo dadka kaleba ama keenaysa khatar aan la aqbali karin waxbarashada iyo waxbarida. Waxaa loo qorsheeyey in laydinku sheego adiga iyo ilmahaaga inaad ogaataan in dabeecadoodu ay u baahan tahay inay hagaagto.

Digniinta tooska waa warqad laga qoray dabeecada la saluugsan yahay ee ilmahaaga. Ilmahaaga lagama joojin doono dugsiga wakhtigan.

### Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu uu helo diginin toos ah?

Dugsiga ayaa kaala hadli doona dabeecada la saluugsan yahay oo kuu sharxi doona digniinta tooska ah oo ilmahaaga. Maamulahaaga ayaa sidoo kale ku siin doona nuqulka qoraalka digniinta ee tooska ah.

Ujeedada digniinta tooska ah waa in la siiyaa ilmahaaga iyo adigaba wakhti aad ku fahamtaan saameynta dabeecadooda oo uu ogolaado qorshaha taageerada ah ee hawlgalka istiraatijiyada wanaagsan. Dugsigu wuxuu ku siin doonaa adiga iyo ilmahaaga fursad aad kula kulantaan iyaga si aad ugala haddashaan dabeecada iyo inaad qorsheysaan ama aad dib u eegtaan taageerada uu ilmahaagu u baahan yahay.

Waxaad u soo kaxaysan kartaa qof taageere kuu ah kulan kasta oo aad dugsiga la leedahay.

Digniinta tooska ah ayaa jiraysaa ilaa 50 maalmood oo dugsiga la dhiganayo. Inta wakhtigan lagu jiro, waxaa laga yaabaa in ilmahaaga laga joojiyo dugsiga haddii dabeecadu mar labaad dhacdo ama wixii dabeecad/o ah ee kale.

### Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu helo digniin toos ah?

Ugu yaraan ilmo kastaa wuxuu sameyn doonaa marmarka qaarkood waxyaalo aan waafaqsaneyn xeerarka dugsiga ama koodhka Dabeecada Ardayda. Marmarka qaakood, markay tani dhacdo, waxaa la siin doonaa digniin ah. Macluumaad intaas ka badan waxaa laga helayaa maxaan sameeyaan haddii ilmahaygu uu dhib ka gelayo dugsiga.

Haddii ilmahaagu uu helo digniin toos ah, tan micnaheedu waxaa weeye waxaa jirta dabeecad u baahan in lala socdo. La shaqeyntaada dugsigu aad ayey u muhiim ugu tahay maareynta dabeecada ilmahaaga iyo wada horumarinta xalka. Kala hadal maamulaha dugsiga wixii ku saabsan digniinta tooska ah lana shaqeeya kooxda taageeraysaa ilmahaaga si ay ula yimaadaan xal.

### Ka waran haddii dabeecadani mar labaad dhacdo?

Haddii dabeecada la saluugay ay mar labaad dhacdo inta lagu jiro 50 maalmood oo dugsiga la dhiganayo laga bilaabo digniintii ahayd ee ugu horeysay, maamulaha waxaa laga yaabaa inuu dugsiga ka joojiyo ilmahaaga. Go'aanka dugsiga lagaga joojinayo dugsiga wuxuu dhici doonaa oo kaliya ka dib marka maamuluhu uu eego dabeecada, iyo baahida gaarka ah ee ilmahaaga iyo carruurta kale. Macluumaadka ku saabsan dugsi ka joojinta ardeyga waa la helayaa.

### Maxaan sameeyaa haddii aan weli wax saluugsan ahay?

Haddii aad wax saluuga ka qabtid oo ku saabsan ilmahaaga waxbarashadiisa, dabeecada ama fayoqabkiisa dugsiga, meesha ugu wanaagsan ee aad ka bilaabayso waa la hadlida macalinka, kalkaaliyaha maamulaha ama maamule ku xigeenka. Arimaha badidooda waxaa lagu xalin karaa iyadoo lala hadlayo dadka yaqaan ilmahaaga iyo xaalada.

Marmarka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad u baahatid inaad la hadashid qof kale, dugsigaagu wuxuu ku siin karaa macluumaadka xiriirka ee xafiiska waxbarashada ee xaafadaada oo laga yaabo inuu ku caawin karo. Sidoo kale ka feker inaad la hadashid dhakhtarka ilmahaaga haddii aad u maleynayso inay jiraan sababo caafimaad oo aad saluugsan tahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u doodista ilmahaaga waa la helayaa, iyo sidoo kale Xeerka Bulshada Dugsiga oo sharxaya siyaalaha dugsiga loola xiriirayo.

### Maxaa macluumaad ah oo aan ka heli karaa dugsiga?

Waxaad weydiin kartaa dugsiga macluumaad intaas ka sii badan oo ku saabsan wixii dhacay iyo sababta. Dugsigu waa inuu kuu sharxaa adiga sababta ka danbeysa go'aan kasta, waxa dhici doona iyo waxaad sameyn lahayd haddii aad arin qabto.

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad dooneysid inaad la xiriirtid dugsiga oo aad caawimaad uga baahan tahay Ingiriiska fadlan ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450, u sheeg luuqadaad u baahan tahay oo weydii xiriiriyaha inuu waco dugsiga. Xiriiriyaha ayaa turjumaan khadka soo gelin doona kaa caawiya wada hadalkaaga. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.